



## PreK 4 ME Family Links


### CUTUBKA 2: SAAXIIBADA

#### Dulmarka Cutubka 2: Saaxiibada

Bishaan waxaan dulmar ku samayn doonaa saaxiibtinimadeena, ayna ku jiraan sida loo xaliyo isku dhacyada, waxa ay ka dhiga tahay inaad noqoto saaxiib wanaagsan iyo la shaqaynta saaxiibadaada fasalka—iyo guriga. Wuxaan diirada saari doonaa sida loogu biiro la ciyaarida ardayda fasalkeena, loo wadaago agabka loona aqoonsado xalal-ka marka isku dhacyo bulsho yimaadaan.

Wuxaan sidoo kale bilaabaynaa aqoonsiga erayada hoorista (deelqaafka) waxaana bilaabaynaa barashada dha-waaqyada erayada ku jira heesaha, gabayada iyo buugaagta. Carruurtu waxay bilaabi doonaa barashada agabka wax qorista waxayna bilaabi doonaan barashada xirfadaheenna wax qorista ee biloowga ah oo lagu siinaayo ciyaar-teena!


#### BUGAAGTA MURAAJACADA ee Cutubka 2



Matthew and Tilly


The Little Red Hen Makes a Pizza

Waxaa qoray: Philomen Sturges and Amy Walrod



A Letter to Amy


Waxaa qoray: Rebecca C. Jones



Dandelion

Waxaa qoray Don Freeman

Sawiro lagasoo dajiyay amazon.com



#### Ciwaanada kale ee bishaan:

Shape Capers Oo ay qortay: Cathryn Falwell

Hooray, A Pinata Oo ay qortay: Elisa Kleven

Every Buddy Counts Oo uu qoray: Stewart

J Murphy

#### 5 Juicy Apples

Shan (5) tufaaxda cabitaanka ah oo saaran dukaan, (magaca ilmaha) ayaa midkood cunay, meeshana waxaa ku haray afar (4)

Afar (4) tufaaxda cabitaanka ah, oo qurux badan, (magaca cunuga) ayaa midkood cunay, meeshana waxaa ku haray sadex (3)

Sadex (3) tufaaxda cabitaanka ah, oo macana badan, (magaca ilmaha) ayaa midkood cunay, meeshana waxaa ku haray labo (2);

Labo (2) tufaaxda cabitanaka ah oo aad u qurux badan, (magaca ilmaha) ayaa midkood cunay, hadda waxaa meeshii saaran hal (1) tufaax;


Hal (1) tufaaxda cabitaanka ayaa kaligeed meesha saaran, (magaca ilmaha) ayaa xabadii cunay, sidaas ayayna ku dhamaadeen (0)!

Dukaanle, dukaanle, fadlan kuwo dheeraad ah dalab—waan jecelnahay inaan iibsano tufaax markaad nimaano dukaankaaga!



Sawir lagasoo qaataay Pixabay

**Arag bogga kale si aad u aragto nashaadaadka guriga**



# Waxbarashada leh Nashaadaadka Dheeraadka ah Gee Guriga!

<p><b>Heerarka Fanka, Hal ABuurka Far-shaxanka iyo Barashada Cilmiga Bul-shada</b></p> <p><b><u>Kaarar samaynta</u></b></p> <p>Ka caawi ilmahaaga samaynta iyo qurx-inta kaarka si ay ugu dirto saaxiib! Sawiro kasoo jar joornaalka, sawir, midab, ama riinji mari xaashi aan waxba ku qornayn ood qayb ahaan isku duubtay. Wuxaa ka caawin kartaa ilmahaaga qorista magaca saaxiibka, iyo magaceeda!</p>	<p><b>Fanka iyo qaababka loo waajaho barashada heerarka</b></p> <p><b><u>“Ku biloow” wax raadinta</u></b></p> <p>U sheeg ilmahaaga inay raadiso alaabaha yaala guriga ama ba-naanka oo ku biloowda dhawaaqa xarafka aad u dhiibta. Tusaale, waydii ilmahaaga inay raadiso sheey ku biloowda dhawaaqa xarafka 'R' ("rrrrrr") Waxaa laga yaa-baa inay hesho rock (dhagax). Had-dii ay u baahan yihiin caawimaad, sii dookha u dhaxeeya dhagax iyo caleen.</p>	<p><b>Heerarka cilmiga bulshada, luuqada iyo fanka iyo xisaabta</b></p> <p><b><u>Aadista suuqa</u></b></p> <p>Ma haysataa dukaanada cuntada ama suuq yar oo ku yaala xaafadaada? U sheeg ilmahaaga inay kaa caawiso qorista liiska adeegga cuntada adinkoo sawiraaya sawiro ama sawiro kasoo jaraaya buuga sawirada cuntoyinka dukaanka adeegga. Dukaa-maysi u kaxee ilmahaaga, adoo tusinaaya alaaboo cusub, kana caawinaaya helitaanka waxa liiskeeda ku jira. Adeegso erayo wax qeexaaya: culus, adag, jilicsan, fudud, si aad u qeexdo alaabaha. Tiri alaabaha intaad isla raadinaysaan ilmahaaga.</p>
--	---	--



Sawir lagasoo qaatay Pixabay

## Tilmaamaha Hadalka iyo Wax Wada Akhrinta

*Biloowga Wada sheekaysiga:*

- Waa maxay qaybta aad ugu jeceshahay sheekada?
- Waa maxya waxa koobaad ee ku dhaca sheekada?
- Maxay kula tahay inuu dhacaayo talaabada xigta?

## Ogaysiis ku socda Waalidka iyo Qoysaska: Maxay Ciyaartu muhiim u tahay?

Xogta hoose waxaa lagasoo qaatay “10 Things Every Parent Should Know About Play” oo uu qoray Laurel Bongiorno, PhD (<https://www.naeyc.org/our-work/families/10-things-every-parent-play>)

Ciyaartu waa hanaanka ilmuu wax ku barto.

Ilmuu waxay ku tababartaan ayna xoojiyaan waxbarashadooda dhinacyo badan intay ciyaarayaan. Waxay siisaa goob iyo waqtii ay wax ku bartaan kuwaas oon lagu heli karin samaynta shaqada wa-raaqda. Tusaale, markay ku ciyaarayaan maqaayada, ilmuu waxay qoraan ayna sawiraan dookhyada cuntada, waxay dajiyaaan qiimayaasha, waxay qaadaan dalabaadka, waxayna lacagta ka qaadaan macaamiisha. Ciyaartu waxay ilmaha siisaa fursado waxbarasho oo waawayn waxayna keenaysaa guusha waxbarashada iyo qabka naftooda.

**Waqtii u samee ciyaarta.**

Markaad tiihin waalidka, waxaa tiihin taageerayaasha ugu wayn ee waxbarashada carruurtiina. Wuxaaq xaqiijin kartaa in ilmuu helaan waqtiga ugu badan ee ciyaarta inta suuragalka ah inta lagu jiro maalintii si loo kobciyo fahanka, luuqada, jirka, bulshanimada, iyo dareenka ilmaha